

Khadka Telefoonka cusub ee warbixinta Coronavirus oo loogu talagalay dadka ajaanibta ah

Telefoonkan ayaad soo wici kartaad si suaalaha caamka ah ku saabsan Coronavirus ugu heshid jawaab. Khadka telefoonku wuxuu furanyahay maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 09:00–12:00 iyo 13:00–15:00

Khadka telefoonka waxaa kuugu diyaar ah la taliyayaasha caafimadka ee ka shaqeeya xarunta Transkulturellt Centrum oo ka jawaabaya wixii suuqaa caam ah oo ku saabsan Coronavirus. Waxay la taliyayaasha caafimaadku ku hadlayaan

luqadaha kala ah Soomali, carabi, Dari, faarsi, tigrinya, amxaari iyo af ruushka.

Khadka telefoonka numberkiisu waa 08-123 680 00. Qofka soo garaaca cod ingiriis ah oo uu dabasocdo midacarabi ah ayuu maqlayaa kadib ayuu luqadda uu rabo dooran karaa.

Marka khadka telefoonka waqtiisu xiran yahay waxaa ku duuban fariin luqadaha ingiriiska iyo carabiga ah ka hadlaysa waqtiyada khadku furanyahay, kuuna tilmaamaysa 1177 iyo 112

Waa wargelin caam ah oo Coronaviruska – Maaha katalobixin caafimaad (sjukvårdsupplysning)

Khadka telefoonkan looguma talogelin talobixin caafimaadka dadka iyo caawimaad ku saabsan xanuun qof bukaan ah u gaar ah in laga bixiyo. Caawimaada iyo talobixinta noocaas ah waxaa laga heli karaa 1177. Khadkan waxaa loogu talagalay in akhbaar ama macluumaad caam ah oo ku saabsan Coronaviruska laga helo. Taas oo muhiim ah si fiditaanka cudurku u yaraado, sida:

- Waa maxay Coronavirus?
- Sidee layskugu gudbiyaa?
- Sidee layskaga ilaaliyaa?
- Maxaa loo leeyahay guriga joog ama guriga shaqadaada ku soo qabo?
- Sidee fiditaankiisa looga hortegi karaa?
- Maxay u fiicnayn in la booqdo ayeeyo?
- Wax dawo ah ma leeyahay Coronavirus?
- Macluumaad iyo war luqado kala duwan ah xagee laga heli karaa?

La taliyayaasha caafimaadka (hälsokommunikatörer)

Waxay leeyihiin khibrad shaqo 10 sano ah oo ku saabsan ka talobixinta iyo wacyigelinta caafimaadka ay siiyaan dadka ajaanibta ah ee dadlka waqtiga yar joogay. Waxay la taliyayaasha caafimaadku ka soo jeedaan dalal kala duwan, waxayna cilmi u leeyihin caafimaadka iyo caafimaadka bulshada

Ujeedada khadka telefoonkan laga leeyahay waxay tahay in culayska looga kala yareeyo 1177 vårdguiden iyo in wax la gaarsiiyo dadka ajaanibta ah. Waxaa soo diyaariyey khadkan telefoonka SLSO iyadoo la kaashanaya shaqaale masuul ahoo ka tirsan Hayadda Caafimaadka, Hälso- och sjukvårdsförvaltning